# Golaha Wakiiladda

## Waaxda Shuruucda, Fadhiyada iyo Hadal-qoraalka

### Golihii 5aad ee Wakiillada, Kal-fadhigii 2aad fadhigii 24aad

*Wakhtiga uu Furma: -* 10:15 AM
***Taariikhda: - Sabti 06 February 2022***

**Gudoonka: -** Mudane, Cabdirisaaq Khaliid Axmed

**Quraanka: -** Md. Siciid Sokeeye

**Ajandaha Fadhiga: -**

- **Doodda Xaalada Abaaraha 2022**

**Md. Jamaal Cali Aadan (6min, 18sec):-** Bismilaahi, waad Mahadsantahay Gudoomiye. Gudoomiyaha Golaha, Mudanayaasha Golaha, Shaqaala iyo saxaafada waxan idin kusalaamayaa ASC.

Godoomiyaha aad baan ugu mahad celinayaa kulan kan uu abaaraha u khaas yeelay, mudane gudoomiye iyo mudanayaal sidaad og soon tihiin in mudaaba waxa dalaka kajiray xaalad aad u adag oo abaareed, xaaladaasi waxay saamaysay dadka iyo duunyadaba, sababta ugu weyn oo abaaratan keentayna waxa weeyaan roobkii dayrta oo aan meelo badan ka di- in, waxa kaloo jiray sidookale, gugii hore oo aan isaguna siwacan udin ama roobab waaweyn oo mahiigaan aanay di-in taasina saamayn bay keentay.

Mudanayaal sidaad wada og soontihiin oo aad kawarqabtaan waxad ogtihiin indadka qaar ku geeriyoodeen, gurmadka socdaana uu fiicnayn, maadaama aynu maanta iskugu nimi fadhigaara uu goluhu sameeyay in xaaladaa abaaraha lagaga hadlo.

Waxaan soojeedinayaa in mudanayaasha golaha wakiiladu isgarab taagaan bulshadaa oo ay taageeraan isla markaana, abaartaa oo soconaysa 3bilood markaa waxa ugu horeeya aynu inagu iska bilowno, oo aynu musharkeena u -goyno mudadaa abaartu jirto.

Sidoo kale waxan soo jeedinayaa inay xukuumada Somaliland latimaado, qorshe abaabulan oo aan dib ladhac lahayn oo lagu gaadh siinayo gurmad deg-dega dadkaa tabaalaysan gurmad kaasoo ah gurmad ay uqalmaan dadkeenaa tabaalaysan.

Waxa kale oo aan soo jeedinayaa in gudiga abaaraha golaha looga yeedho oo runtii aan u-arko inay gaabis weyn, aykujiraan iyo isla meeraysi iyo shirar aan macno weyn lahayn oo aan waxba kasoobixin wxan soo jeedinayaa in golaha looga yeedho gudida abaaraha isla markaana looga xog waraysto xaaladan aynu kahadlayno.

Sidoo kale waxan soo jeedinayaa in qurba joogta Somaliland ay qayb weyn kaqaataan gurmadka deg-degaa si loogu fidiyo oo loo samata bixiyo dadkaa ay abaaruhu saameeyeen.

Waxan kaloo soo jeedinayaa inay hay'adaha qaadhaan bixiyaashi- ihi ay qayb-kaqaataan gurmadka lagu taban taabinaayo shacabka tabaalaysan.

Ugu danbayn waxan soojeedinayaa maadaama ay xaalada abaartu tahay mid sanad walba soo noq-noqta islamarkaana sanadkii ama labadii sanaba martimaada, si aynu xal waara uga gaadhno inaynu golahani uu yahayay golihii qaranka, islamarkaana ay umadu wax-kuqabsankarto iskaashi iyo wax wada qabsi, inmiisaniyadaha soosocda uu xaq-uleeyahay miisaaniyada in (budget )loogu talagalo, maadaama ay qaybata fulinta ay ku guul daraysteen in ay fulinwaayaan in biyaha, laqabto, islamarkaana biyaha dhulka hoostooda kujirana lasoosaaro,in arintaa goluhu miisaaniyad u-qoondeeyo oo ay miisaaniyadaasi aynoqoto mid-ayfulinayaan hay'adaha kushaqalihi, in aynu arintaa xilweyn iska saarno, isla markaana sanad waliba wixii lahayo logo gooyo si aynu abaarahan soo noq-noqonaya aynu xal uga gaadhno.

**Md: Maxamed Xuseen Jaamac "Raambow"** **(4min, 31sec):-** Bismilaahi raxmaani raxiim, mudane gudoomiye waad mahad santahay iyo mudanayaal, Waxan xilibaan Jamaal kutaageersanahay dhamaan qodobada uu soo jeediyay oo kusaab san abaaraha, mudane gudoomiye waxan soo jeedinayaaa inaynu fadhi abaaraha kusaab-san aynu yeelano inagoo dadkeena laqaybsanayna duruufta adag ay kusugan yihiin, mudane gudoomiye gobolada dalka oodhan abaartaasi way kawada jirtaa siiba gobolada bariga, laakiin anigu maanta waxan dul istaagayaa gobolka maroodi jeex aan kasoo jeedo iyo dee gaanada kuxeeran abaartu waxad moodaa in 30kii maal mood ee ugu dan beeyay waxad moodaa ianay si xawliya utaabatay oo ay baad iyo biyo la aani isku darsatay.

Waxan Mudane gudoomiye soo jeedinayaa qodobadaa uu mudane Jamaal soo jeediyay, waxan kudarayaa ganacsatada dalka kafaa ida ay maanta tahay xiligii ay ubaahnaayeen dadkoodu, Akhiro iyo aduunba wax bay utaraysaa, Waxan mudane gudoomiye soo jeedin lahaa hay'adaha caalamigaa abaartii udan baysay qayb-baykaqaateen wayna u gurmadeen gaar ahaan degmada bali gubadleh.hay'aduhu silixaad leh ha uga qayb qaataan sanadkan aynu baaq u dirno.

Waxan kaloo soo jeedinayaa in gudiga abaaraha ee dhisan in lixda gobol ee waaweyn gobol walba xilibaan lagaga soo-daro oo aynu xubno kuyeelano, si ay uhelaan war (update) oo subax walba soo kordha oo xilibaanadu deegaanadooda uga waramaan, oo aanay gudida abaaruhu meel gaar ah ugu mashquulin.

**Md: Cabdikariin Aadan Cali (5min, 03sec):-** Bismilaahi, Mudane Gudoomiye iyo Mudanayaasha, shaqaalha iyo Aaxaafada ASC, **aad** baan kaaga mahad celinayaa farsadanaad isiisay oo ay noqotay maalin aynu kahad li doono, abaaraha iyo xaaladaha ay wataan ee soo- waajahay dadkeena, iyo dalkeena waxan doonayaa inaan guda galo kelmadayda.

**Waxan** baraarujin lahaa inaan idiin sheego Abaaruhu waxa ay maraan sadex heer –bay maraan marka 1aad waa inay abaari dhacdo, oo dhulku qalalo cawsku yaraado biyuhuna yaraadaan, waxay keentaa haraad iyo gaajo, haraad iyo gaajo markay timaado waxay keentaa xanuun, dadka uyimaada iyo xoolaha taas oo dabadeedna, gaadhsiisa inay xooluhu baxaan, kadibna halkaasi katimaado macaluul, hadii ay heerkaa macaluusha lagaadho waa heerka ugu dan beeya ee ay xooluhu iyo dadkuba xasuuqmaan,illahy hayna kahayo iminka waxaynu maraynaa xaaladii 1aad meelaha qaar kood oo duruufaha jira awgood noqon karta mid adag. Waxa laga yaabaa abaaruhu waxay si rasmiya ubilaab meen bishii January waxaynu hadeerna kujirnaa bishii 2aad.

Markaa waxan soojeedinayaa gudoomiye iyo mudanayaal oo aan kudarayaa arintii iga horaysay ee ay soo jeediyeen labada xildhibaan ee iga horeeyay madaama uu dalku ku jiro xaalad deg dega xaalad gurmad in golahan laxidho oo aynu kaqaygalno gurmadka abaaraha.

Waxan soo jeedinayaa inaynu gudano waajibka ina saraan ee dastuurigaa oo aynu nahay codkii dadka iyo matelaadii dadka oo aqal layskugu keenay inaynu nahay dadkii oo hadlaya waa inaynu noqonaa dadkii oo hawlgelaya oo dadka wax u qabanayna, waxa runtii gudoomiyuhu soo-jeediyay inaan la dhaliilin xukuumada majecli inaan cid dhaliilo laakiin xaqiiqdeenu waxa weeye inaanay aad xoog u ahayn, waxayna taasi keentay inay xubnaheena baarlamaanka ay umuuqatay inaanay gudan Karin waa jibaad kii saarnaa gaar ahaan deegaan kii laga soo doortay inaanay sax ugudan Karin, hada information sugan sida aynu uhelnaa adagtahay.

- Waxan soojeedin lahaa ianaynu qaadano door hogaamineed oo aynaan cidna udaba joogsan inaynu tagno goobihii dadku ay kudhimanayeen kuharaadayeen xooluhu ay ku bakhtiya yeen oo aynu laharaadno aa aynu la gaajoono oo aynu goobta lajoogno ilaa inta raxmada allh laga helayo.
- Waxan kudarayaa qodobkii uu jamal soo jeediyay ee ahaa in wax la abaabnulo.

- Waxan kudarayaa inaynu samayno barnaamij TV kabaxa oo baarlamnka iyo xukuumada iyo culimada ganacsatada cidwaliba ay hugaamiso, dadka miigii joo-ga wax laga soo-duubo, barnaamijkaa oo midaysan.
- Waxan soo jee-dinayaa fikrad hore aan uqabay oo ahayd in uu goluhu sameeyo hay'ad sama fa loo golaha hoos timaada taas oo si joogta ah qaadheenkeena ugu ururinkarno xaaladaha markaa taagana aynu wax kaga qaban karno, lana kaashan karno hay'adaha waaweyn iyo xukuumada iyo cidii kale ee wax inagu taraysa inay wax inagu soo-  kordhiyaan si aynu ugudano waa jibaad keena, maadaama aynu ahayn xubnaheena golaha joogaa dad maamula dhaqaale iyo (budget) baahi kasta oo lasoo gud boonaatana ay noqonayso inay mushaharkooda yar ay kudebaraan intaa waxan kusoo koobayaa arinta abaarta.

**Md: Maxamed Jamac (Koodbuur)** **(3min, 42sec):-** shir gudoonka iyo mudanayaasha iyo shaqaalha baha waxan kusalaamaya aslamcalykum.

Waxan soojeedin lahaa intay abaaruhu jiraan wiigiiba maalin inaynu doodan jog tayno oo is xog warsano oo xog dheeraada raadino oo hadaba waxaynu ku kordhinayno iyo anigu intaa waxan raacinlahaa goluhu inuu yeesho maalin is xog waraysiya oo aynu ksdoodns wacyiga kajira dalaka, halka goluhu 3cisho gudiyadu ka shaqeeyaan, inaynu u astayno maalin aynu iska xogwaysan xaalada guud eedalka.

Waxan intaa kudari lahayn sida Jamaal sheegay inaynu gudida abaaraha uyeedhno oo aynu waraysano qorshe waxa uga yaala arinkan. Waxan kaloo intaa kudari lahaa inaynu inagu laftirkeenu kaqayb qaadano wixii dhaqaalaa ee inagag aadan deegaanadeena, Waxan qabaa in xukuumadu madax weynuhu uu tago gobolada aad u duruufaysan, oo isga laftirkiisu ukuur galo wasaaradaha qaabilsan ula xisaab tamo.

**Md: jaamac Abokor Dube** **(3min, 18sec):-** Gudoomiyaha golaha wakiilada xilibaanada shaqaalaha asalamucalykum. Inta badan waxan la qabaa xildhibaanada waxana waan kordhinayaa.

Waxan soo-jeedinayaa inaynu gudida abaaraha aynu is waraysano, laakiin waxan qabaa inaynu baaq caalamiya dirno, way inoo sheegeen dawladihii iyo hay'adihii aynu saaxiibada ahayn, laakiin sada aad wada taqaaniin ama aad og tihiin gurmadada caalamiga xiliga ay imanayaan marka la gaadh siiyo wacyiga, waxaa laga yaabaa inay imanayaan xiliga aynu abaartaba ka baxnay.

Waxaan doonayaa marka hore inaynu Illaahay ka baqano oo aynu Illaahay ka barino inuu inaga soo jebiyo abaarta, in si wada jira loo shaqeeyo inagoo cidna canaanayn, la gurmado qurba joogtii oo ay is xilsaaraan oo halkan fariimaha aanu ka dirayno ay

dhegaystaan oo qof waliba degaan kiisa caawiyaan sidii awalba dhicijirtay hay'addaha caalamigaa iyo dawladaha aynu la saaxiibka nahay anagoo ku hadlayna magacii shacabka ayaanu kaga faa idaysanaynaa, laakiin waxad ogaataan inay arrinku inaga taf-balaadhan tahay.

**Md. Cabdikariin Aadam Cumar** **(6min, 27sec):-** Shir-gudoonka, Mudanayaasha, Shaqaalaha waxaan idinku salaamayaa Salaanta Islaamka ASC,

Waxaan soo jeedinayaa Mudane Gudoomiye iyo Mudanayaal inaynu talaabada ugu horaysa aynu qaadno oo aanay wexeenu noqon hadal oo-uu ficil noqdo.

Waxaan soo jeedinayaa Mudane Gudoomiye iyo Mudanayaal $300 82 xildhibaan baynu nahee, hadii aynu iska jarno wax alleh iyo waxay ina yeelayso ma jirto dadkana wax bay taraysaa, $300 waxay noqonaysaa hadii 82 lagu dhufto $24.600, waxaan ku darayaa $15,400 oo ay shirgudoonku ay ka saaraan (budget) Golaha xisaabtaas oo noqonaysa 40.000$

Waxan soo jeedinayaa Mudane Gudoomiye iyo Mudnayaal $40,000 sida ay sheegayaan dadka xog-ogaalka ahi booyadii inay tahay $200 meelaha fog fog meelaha dhawna ay tahay 150$ marka laysku celceliyo meeshii dhow iyo meeshii fog, $40.000 waxay noqonaysaa 200 oo booyadood, 200 ee booyadood waxay noqonayaan wax tar wayn, waxaynu noqonaynaa dad wax qabtay, balamihii maalintii aynu ololaynaynay aynu balan qaadnay waxaynu noqonaynaa dad inuun ka qabtay

Markaa Mudane Gudoomiye iyo Mudanayaal waxan soo-jeedinayaa inaynu noqdo maadaama aynu ka hadlayno abaarihii oo aynu doonayno inaynu dadkana waxa nidhaahno horta inaynu nafaheena wax nidhaahno oo aynu nafaheena wax ka jarno kaasi waa qodob.

Waxaan soo jeedinayaa in Golaha guurtida ee ina ag fadhiya ee aynu isku midka nahay isku dabeecada nahay ee aynu isku shaqada nahay ee layna soo wada doortay iyagana waxan baaq ugu diryaa inay sidaas oo kale yeelaan, dadkaa aynu maanta ka hadlaynaa waa dadkii ina soo doortay, maanta maalintii wax lala hadhayay maaha, maalintii hadalkana maahee waa maalintii ficilka,

Waxaan soo jeedinayaa waxa jira hay'addo xildhibaanadii iga horeeyay ay sheegeen, hawshan u aas-aasan oo u xilsaaran, sada hay'ada ka hortaga aafooyinka iyo kaydka raashinka oo gudi qarana, waxa weeye inaynu fariin teena gaadh siino, anigu fikirka aan qabo maanta maalintii aynu u yeedhaynay maaha ee aynu waraysanay ee waa maalintii halka ay taagan tahay xasuusin lahayn.

Waxaan kale oo aan soo jeedin lahaa ama aan baaq u dirayaa oo aan uga faa'iday sanayaa fursadan qaaliga ganacsatada reer Somaliland, inkastoo yihiin dad aad u wanaagsan oo khayrka jecel hadana maanta oo kale waxsa loo baahan yahay inay xasuustaan da kooda oo hantidaa iyo maalkaa ilaahay siiyay ay ka bixiyaan wixii lagu lahaa ee dadka masakiinta ay ku lahaayeen khayr iyo xasanadaa iyo ajarna way ka helayaan.

Waxan soo-jeedinayaa abaaruhu maaha wax maruun yimaada, laakiin waa wax marwalba soo noq-noqda sanad haday naga maqnaadaan waa wax sanadka kale imanaya, qofka bini'aadan kaana waa inuu saacadaha iyo wakhtiga iyo sanadaha soo maraya uu wax ka barto, waa inaynu u diyaar garawnaa oo qorshe iyo plan cad ka yeelano inaga iyo xukuumaduba sidii aynu uga hortegi lahayn ama ugu yaran aynu u fuduudayn lahayn dhibtan marwalba soo noq-noqonaysa, biyaha wax waa laga qaban karaa, waayo roob baa inoo da'a, roobkaasi baduu tagaa, waxaan aaminsanahay inaynu samayn karno meelo biyha inoo qabta dhaamam oo kale oo wakhti ina gaadh siiya.

Waxaan ka loo ku raacsanahay xildhibaanadii iga horeeyay inaynu illahay barino rabi ayaa wax qabta isaga gacmaha aynu u taagano.

**Md. Xirsi Cabdillaahi Xirsi (4min, 10sec):-** Bismilaahi, Mahadsanid Guddoomiye. Runtii xaalada abaareed ee taagan ee aan dhamaanteen wada taabanay waa mid aan war badan ka hayno waana mid dalka guud ahaantii wada taabatay, gaar ahaan Gobolka togdheer oo runtii abaarta ku horaysay, waxaan kale oo iyana aan ku darayaa in gobolka saaxil ay abaarta soo gadhay gaar ahaan tuulooyinka ku teedsan xeebta oo iyagu u dheer dhulka kale inay yihiin dhul aad u kulul oo iyagu aanay marna u adkaysan karayn biya la, aan

Runtii anigu waxaan soo jeedinaya saddex qodob oo koob-kooban marka hore na xildhibaanada kale waan ku raacsanahay inaan Illaahay u barino oo runtii Illaahay uun baa inaka dulqaadi kara oo duca badan ducaysano oo masaajidada aad looga duceeyo.

Gudoomiye, anigu waxaan soo jeedinayaa inaad magcawdo gudi ugaara abaarta oo inagu iska leenahay oo abaarta u gaar ah, taas oo la shaqaysa gudiga abaaraha ee xukuumada iyo cidii kale ee markaa abaaraha ka shaqaynaysa marka intaynu inagu ku biiri lahayn gudiga abaaraha ee xukuumada, aynu gudi gaara samayno oo waxaan ku talinlahaa in ay business committee-ga ay u bataan Gudiddaas gaarka ahi madama ay iyagu metalaan Golaha.

Waxaana halkaa aan ku darayaa inaan baaq gaara u dirno dadka tunka weyn leh ee jooga dalkeena sida shirkada DP WORLD oo aynu u dirno inay si active ah ama si xooga uga qayb qaadato inay abaarta wax u soo goyso oo ay halkaa gacan weyn ay ka qaadato.

Waxan kale Waxaan soojeedin lahaa madama abaarta weli ay marayso wakhtigii looga bartay wakhti ka soo horeeya oo aynu maanta ku jirno bishii labaad hadii aan Illaahay raxmaatkiisa ina siin weynu ku ducaysanaynaaye ay kasii kululaan karto

Waxaan soojeedin lahaa anigu in mashaariicda horumarka ah ee dalkeena ka socda si tempapery ah loo hakiyo si hadaynu lacagta mashaariicda horumarka ah u baahano in aynu dadkeenu ku samatabixino iyaga xagooda u jeedino oo hadiiba dadkiiba le'daan waxba tarimayso mashaariic horumar oo badan aynu samayno.

Runtii tallo aan mar hor na soo jeediyey iminkana aan ku celinayo ayaan ku dari lahaa oo ah halkan maalinti dhoweyd wadamada doorashada inaga tageera waxay yiraahdeen lacagtii doorashada waa diyaar wax muhimana noqon mayso goluhu hal milyan ee dollar ee u u ansixiyey doorashada, Waxaan soo jeedinayaa hal ka milyan ee dollar inaynu ka daba tagno siduu u dhan yahayna aynu abaaraha u soo celino, marnaba macquul maaha dadkoo halkaa maraya oo haraad u dhimanaya in aynu inaguna lacag doorasho aynu ka sheekayno, marka aynu halkaa milyan dib u soo celino.

Taladayda waxaan ku darayaa oo kale wadamada inala saaxiibka ah sida Imaaraadka iyo Taiwan in aynu baaq degdega ah siino oo iyagu inooga soo horeeyaan wadamada kale ee caalamku sida ugu dhakhsiyaha badan leh xidhiidhka inaga dhexeeya inagoo uga faaidaysnayna ay dadkaa caawima degdega ah soo gaadhsiinayaan.

Waxaan ku soo koobayaa taladayda midh iyadu wakhtiyada dame inaga caawimaysaa abaaraha runtii mar walba waxaynu bixinaa mashaariic waxaynu qodnaa ceelal, waxaan runtii aan u arkaa inay ka muhiim santahay halkaynu ceelalka ka qodayno inay dawladu soo iibsato riigii qodayey ceelasha oo hadaynu shan riig oo somaliland u gaara soo iibsano oo riigiiba labaatan ceel inoo qodo sanadkii waxay noqonaysaa arrin wakhtiga dame aynu shidaalko keliya iska bixino markaa aynu ceelal badano dhaadheer aynu qodankarno, runtii intaan ogahay mashiinka riiga ah ee ceelasha dhaadheer qoda $200 ilaa $300 oo kun oo dollar ayuu ku kacayaa, marka hadaynu soo iibsano shan rig waxay inaga caawin doontaa inaynu ceelal dhaadheer helno oo meelaha abaaruhu ku kulul yihin aynu biyaha dhulka hoose u soo saarno

**Md. Ibrahim Cali jaamac** **(3min, 29sec):-** Bismilaahi, Qaxaan aad iyo aad ugu faraxsanahay maanta inuu Goluhu fadhi ka yeesho xaalada ku saabsan abaaraha runtii aniga gobolka layga soo doorto ee sanaag iyo weliba sool xaalada abaaaruhu aad iyo aad bay udaran tahay waxaa kale oo dheer gobolka sanaag dad badan baa usoo guuray dhinaca puntland ayaa kuso guuray dadkii degaanka deganaa waxaa saaran laba culays mid waa ka abaarta midna waa ka dadka soo guuray runtii in badan waa ay ilasoo

xidhiidheen iyagoo aad uga cabanaya biya la'aan iyo baad la'aanba iyago aad u dalbanaya sidii looga caawin lahaa sidii ceelashooda loo maintain garayn lahaa.

Waxaan baaq u dirayaa Wasiirka Wasaradda Biyaha oo runtii markii uu halkan inoogu yimina aan aad iyo aad uga waraystay xaalada ceelasha iyo dhaamanka halkaa ku yaala, iminkana waxaan aad iyo aad ugu boorinayaa in uu degaanada sanaag guud ahaan uu runtii uu ku bixiyo attention gaara sidii uu ceelasha uga caawin lahaa maintain garayntooda inta qodan sida matoorada oo kale.

Waxa kale oo dhamaan mudanayaasha ku taageersanahay talooyinka ay soo jeediyeen waxaanse doonayaa inaan u yara xoojiyo in hadii aynu maanta hal kan kaga dhawaaqi karayno aynu kaga dhawaaqno sanduuqa gurmadka abaaraha xildhibaan kasta wuxuu awoodo uu tabaruc uu ku samayn karayo si aynu ula gaadhno oo degdega wax ugu samayno.

Tan kale waxaan ka codsanayaa golaha maadama guddoomiyuhu uu sheegay inay jiraan xeerar lagu asaasay gurmadka degdega ah wixii fulin aynu ku leenahay ee golaha xeerdejintu uu ku leeyahay aynu u magcawno oo aynu taana meel dhigno

**Md. Axmed Cabdi Ibraahim "Tima-jilic" (4min, 8sec):-** Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal aad iyo aad baad u mahadsan tihiin.

Waxaan is leeyahay arrintaa abaaaruhu waa mawduuc aad u wanagsan inaynu ka hadalno, arrintaa abaaaruhu waxay u badan tahay technically marka aynu abaaraha wax ka sheegaynona waxaa weeye biyaha iyo baadka.

Arrinta kowaad waxaa weeye arrintaa biyaha, arrintaa biyahana waxaan is leeyahay ama ha noqoto gudiga ama ha noqoto hay'addaha caalamiga ah UN ka iyo international organizations ka labaduba ay ku jiraan ama ha noqoto baarlaman ahaan contribution waxaan samayn karno ama ha noqoto qurba joogteene ee in aynu isla garano wax wanagsan maxaa qaran ahaan loo baahna yahay in la qabto.

Waxaan isleeyahay qodobka kowaad in ceelasha dalka ka jira horta ay dayac tirmaan buhoodle oo kale oo xalay laygala soo hadlayey ceelku waa fadhiyaa markaa ceelasha dayactirkoodu waa qodobka kowaad.

Anigu waxaan soojeedinayaa 12 ceel oo sool ah, 20 ceel oo maroodi-jeexa, 12 ceel oo sanaag, 8 saaxil ah 13 awdal ah iyo 17 togdheer ah in ay bishan horaanteeda ay ino noqdaan targetka kowaad Baarlaman ahan ugama jeedo laakin ka qaran ahaan ayaan uga jeedaa, in ay at least target kaa noqdaan dayactirku waa mid fudud iyo mid culus, gudidda arrintaa aynu u soo jeedinaynaa waxaa weeye in dayactirku cusub ee degdega ah ceelashasina bishaa iyo hadii uu roobku raago labadaa bilood lagu talagalo

shidaalkooda inamada ku shaqaynaya in horta la diyaariyo ceelasha. Hadaan soo qaado example sool oo kale ganbadhe oo kale waa meelaha muhiimka ah, Aw boogays waa meelaha aad ka u muhiim ka ah ee ilaa sarmaanyo oo kale laga waraabinayo, xaga sanaag ceelasha qaar badanoo istaaratiji ah baa jira marka kuwa istaratijiga ah in geographically lagu horeeya

Total ka booyadaha bisha kowaad aan u baahanahay ee bulshada laga waraabinayo 22kun ugu yaraan bishaa hadii xaga lacagta lays weydiiyo waa ilaa $440 kun oo dollar hadaynu inagu ku yaboohno $15 kun waan hubaa UN ka inala jooga inay bixinkaraa $100 ilaa $200 kun, arrintaa international organizations-kuna iyadu sidaa si la mida waxay u baahantahay qoraal shir-gudoonka sameeyo loo diro iyagaan aan la xidhiidhno, arrintaa booyadaha iyo diyaarintooda hadii ceelasha la diyaariyo hadana booyadihii baa ku xigaya biyadaha iyo diyaarintooda kolay si gaaban baan u sheegay.

Qodobka kale xukuumada iyo budget ka lacagta inooku jirta weli waxaan is leeyahay waad haysantaan meel aad qaylisaan oo ilaa xad la qayliyo ma joogno laakin qayladu waa sii diyaar garowga bisha labaad wixii emergency ah ee lahayaa/hayno noqdaan hawl galka kowaad.

**Md. Axmed Mahamed Hure** **(6min, 3sec):-** Bismilaahi, Waxaan aad ugu mahadnaqaya Golaha Wakiiladda oo maanta u gartay in aynu fadhigeena ku muujino duruufaha iyo xaaladaha abaareed ee ku gedaaman Gobolada Somaliland.

Sidaad la socotaan, anigo ka mida gudidda dhaqaalaha waxaa jirtay kal-fadhigeenan inoo furan markii gudiyada warbixinada inala wadaagayeen , warbixintii golahan aan la wadaagnay waxaa ugu horaysay baaqa abaarta ee ku aadan gobolada bariga weliba gaar ahaan gobolka togdheer weliba daadmadheedh ama oodweyne sidoo kale aan ogaal dheera u leeyahay xaalada abareed iyo gurmadka loo sameeyey gobolkaa runtii biya dhaamisku wuxu bilaabmay bishii 12aad xaalada biya dhaamisku maalinba maalinta kasii damaysay waykasii daraysaa qiimaha bishii December booyadu taagnayd waxay ahayd $150 dollar iminka waxay caga cagaynaysaa $300 dollar, waad dareemi karaysaan baahida gobolkaa haysata biyaha dhaamisku la sameeyo waxay gaaraan magalooyinka iyo inta ku teedsan waxaa aad u haraadsan oo iyaga la ilaaway waxaa weeye dadkii reer miyiga ahaa ee xoolaha hayey iyo xoolihiiba, hadii abaarta sii daba dheerato waxaa dhacaya in xoolihiina waxay cunaan waayaan oo dadka miyiga jooga xaaladu gasii darto oo culaysku inakusii siyaado.

Sido kale, waxaan jeclan lahaa sidii walaalahyga iga horeeyey ay sheegeen in gudiga abaaraha aan u yeedhno, waxaana mooda in lays la sugayo goboladii abaarta oo kii maanta abaarta daran ka jirtay aan waxba laga qaban, midkale lala sugayo, iyada

laftigeeda culays bay ku noqonaysaa marka in hada wixii lahayo la siidaayo oo sida loo kala daran yahay loogu kara horeeyo.

Waxyaabaha aan soo jeedinlahaa waxaa ka mida miisaniyada inagu soo socota ee la yiraahdo miisaniyada supplementaryga oo ka timaada sanadkii dakhligii la filayey ayaa kabatay kharashkii, dakhliga ka batay waxaa loo qoondeeya meelo markaa waxaan jeclan lahaa in xukuumada runtii aynu ku boorino ee 100% miisaniyada dheeraad ka ee ka timi 2021 loogu talagalo abaaraha gobolada haysta.

Waxaan kale oo soo jeedinlahaa inaynu si gole ahaana aynu ugu qaybqaadano calaa xildhibaan waxaan jeclan lahaa inaynu $500 oo dollar u goyno oo intaasu noqoto wax emergency ah aynu uga dhigno.

Waxaan la qabaaa Xildhibaanada so ojeediyey in shirkada DP World oo ah shirkad maalgashi badan samaya, maalgashigeedu shaqayn maayo hadii dadkii dalka anay la qaybsan markay xaaladan oo kale markay ku jiraan. Waxaynu u baahanay in Golayaasheena qaranka ay ka soo baxaan shirka qaran la-dagalaanka abaaraha waana in aynu mudnaanta la siiyo biyaha.

**Md. Siciid Jaamac Cali** **(7min, 25 sec):-** Waad Mahadsantahay Mudane Guddoomiye, abaaraha weynu garanaynaa oo waa wax dabiici ah iyo mid dadku keenayba ee inagu sabab u nahay markaynu degaanka dhirta ka dhamaynay oo dhuxul laga dhigtay, taasu waxaa weeye aafooyinka ayay ka mid tahay ee dadku keensado ee keena roob yaraanta mudanayaal Illaahay uun ba inaga saari kara baahida abaarta ee dalkeena ka jirta maanta in aynu Illaahay barino oo gacmaha cirka utaagno ayaan qabaa.

Saddex bilood ugu yaraan ayaa inagu soo wajahan oo aan is leenahay hadaan ilaahay inaga saarin abaarta wey jiraysaa dhamaan abaartasi gobolada waa samaysay ha lagu kala sii darnaado. Hadan tusaale u soo qaato gobolada sanaag iyo sool waxaa abaarta u sii dheer soo guuraa qayral caadiyaoo ka yimi gobolada dhexe iyo nugaal buuraha ayay sii socotaa wey dhaaftay dooxooyinki xeebaha ayaa lagu sii jeeda waxaa la yiri meel 40km u jirta ceerigaabo galoolki iyo geelibii is leekaaday.

Qodobka kale ee u sii dheer sool iyo sanaag waxaa weeye nabadgelyada dadkan inta badan waa dad dakanooyin, godobo iyo arrimo khatara kala qaba in kastoo dadkeenu ay gob yihiin oo runtii dadkaa u yimi ilaa hada aanay waxba u geysan, lakin in xaalada nabadgalyada la adkeeyo waan soojeedin lahaa

Xaga ceelasha, waxaan qabaa in la dayactiro oo aad loo dedejiyo degmada la yiraahdo Bohol waxaa ku yaala ceel inagoo og in badana ceelasha qadhaadh yihin ceelka waxaan ku so aragnay oo dulyaala mashiinka biyaha macaaninayay, Wasaradda waanu kala

hadalnay hadii mashiinka la rakibo dhul badan buu u dhaamin lahaa runtii wan rajaynaynaa in lagu guulaysto wasaraddana in badan kala hadalnay. Waxaan soo jeedin lahaa in aynu kaga qayb qaadano ka gole ahaan bil mushaharkeed oo markaa gudiga aan samayndoono ama gudiga abaaraha hadba meeshii loo garto lagu wareejiyo.

Waxakale oo soo jeedinayaa madama abaaaruhu inagu soo noqnoqdeen in la soo celiyo seerayaashii ka jiri jirey degmooyinka iyo gobolada oo lagu baxsan jirey wakhtiyada abaaraha sida Xudun, Ceerigaabo, Ceel afweyne, Aroori, Qool-caday iyo SeerayaashiiHhargeysa seerayaal badan baa jirey oo xiliyada barwaaqadana la xidho jiilalkana la furo waa lagu baxsan jirey waaxaan aad iyo aad u adkaynayaa in seerayasha la soo celiyo

Waxa kale oo odhanlahaa inaan baaqa caalamiga ah ee xildhibaanadu soo jeediyeen aynu samayno, waxa kale oo soo jeedin lahaa inaan fasaxeeni caadiga ahaa oo aan filayo inuu maanta taagan yahay inaynu galno si aynu dadka u gala qayb qaadano dhibaatada iyo arrimaha taagan ee abaarta.

**Md. Saleebaan Axmed Carab** **(6min, 11sec}):-** Kolay waxaynu isku raacsanahay in abaar baahsan wadanka ka jirto, abaarta oo u sii badan gobolada bariga haba ugu darnaado gobolka Tog-dheer iyo weliba gobolada Sool iyo Sanaag oo iyana xaalada abaartu ka jirto oo ay u sii dheertahay soo guurtadu, kolay anigu dalkaan soo marmaray meelo badan oo aan waraysatayna wey jiraan, meela qaar bishii tobnaad ayaa biya dhaamisku bilaabmay waxaa taas u sii dheer dhanka xoolaha oo iibkii aad u liito.

Waxaan la qabaa wixi rayi ah ee xildhibaanadu sida qotada dheer uga hadlay ilaa iyo hada wax ka jawaabay oo si toosa uga jawaabay abaarta soconaysay shanta bilood lama hayo xukuumada qaybtii ugu jirtay miisaniyada ilaa 30% waysiidaysay iminkana diyaar way latahay sidan maqlay, akoomadii kale ee loogu talagalay emergency ee iyana kaalmaynayey waxaan ugu baaqaynaa inay iyaguna diyaar garoobaan oo ku tala galaan inay iyana qaybtooda diyaariyaan.

Waxaan kale oo baaq ujeedinayaa dadka aan ka jawaabin iyo dawladdaha aan deriska nahay iyo NGO yada madama aynu ognahay in abaartu qaybo badan yeelato intaana waxaan u baaqaynaa inay si degdega ah uga soo jawaabaan.

Waxaan soo jeedin lahaa ka gole ahaan inaynu saddex qaybood kaga qayb qaadano. **Tan kowaad** waxaa weeye hanti inaynu iska goyno hanti oo gudina u samayno akoona u samayno, anigu waxaan leeyahay inaynu $500 u goyno ilaa inta abaarta dhamanayso bishiiba intaa iska jarno, hadba meeshay ku daran tahay aynu ujeedino, kolay xildhibaanada way u dheertahay nin walba degaankisa iyo danaha gaarka ah ee haysta in culaysku uu iska jiro.

**Tan labaad**, Waxaan soo jeedin inaynu baaq aynu u midaysanahay kaga qayb qaadano oo aynu gaadhsiinayno cidkasta oo ay khusayso. **Tan saddexaad**, inaynu ficil kaga qayb qaadano sidaa Xildhibaan Siciid sheegay fasax galno inaynu xaalada degdega ah ee inaguso korodhay darteed si aynu meel walba ugu kuur galno xaladaheeda.

**Md. Faysal Yusuf Jaamac (3 min, 21 sec):-** Bismlilaahi Raxmaani Raxiim. Guddoomiyaha, Mudanayaasha, Saxaafada iyo Shaqaalaha Aslaamu Calaykum Warax matulaahi Wa Barakaatu. Aad bay u mahadsan yihiin Mudanayaashii inoo soo jeediyey inay Golaha kaga hadalno arrinta abaarta.

Waxaan soo jeedinayaa inay ilaahay barino dhammaanteen, waayo gacanta ilaahay ayaa lagu ciil bixi karraa. Waxaynu booyadno hayno iyo waxaynuadduun hayno haddii aynu isu gayno way is kar yihin waxay taraan, waxaan soo jeedinayaa in aynu ilaahay barino dadkuna Alle baryaan oo ay dembi dhaaf ilaahay waydiistaan oo ilaahay u noqdaan.

Xaaladan waynu aragnaa waa xaalad jirta oo inoo muuqata, waxaynu ku mashquulnay siayaasada iyo ururo la furo, Guddoomiyuhu kuu ku mahadsanyahay in aynu ka hadalno.

Waan taageersan in aynu ka gole ahaan iyo xildhibaano ahaan aynu ka qayb qaadano. Waxa kale oo aan soo jeedin lahaa guddoomiye in Golaha fasax la galiyo, si aynu hawshaa uga qayb qaadano oo wixii inaga aadan aynu qabano.

Waxaan raacsanahay mudanayaashii soo jeediyey. Gobaladu way kala daran yihiin waxaan ugu daran Gobolka Togdheer, waxaana ku soo guuray dadka deegaanka Soomaalida, waana Gobolka ugu xuduuda dheer. Waa gobol ay biyuhu ku yar yihiin abaartana waa mid soo jeetamaysay, iyadda oo Gudida abaaruhuna sii daysay wixii ay haysa. Waxaan soo jeeinayaa in aynu fadhiga ka kacno oo ka qayb qaadano gurmadka abaarahan.

**Md. Abukabar Siciid Cali (5min, 31sec):-** Bismlilaahi Raxmaani Raxiim. Guddoomiyaha, Mudanayaasha, Saxaafada iyo Shaqaalaha Aslaamu Calaykum Warax matulaahi Wa Barakaatu.

Ilaahaybaa Mahad leh, waxaan u mahadcelinayaa Xildhibaan koodbuur oo arrintan soo jeediyey, adna Guddoomiye waad ku mahadsan tahay in aad arrintan maanta aad khaas uga dhigto in laga doodo arrintaa taagan ee abaaraha.

Abaartu sidaa loo sheegay way jirtaa, hase yeeshee dadka waxay u kala taabanaysaa siyaabo kala gedisan oo ay ugu horeyso biyo la'aantu, dalagii beeraha, cuntaddii iyo calafkii xoolaha oo iyganuna yaraanaya. Intaasi markay dhacdo saamayn negative ayaa ka dhalanaysa oo ka mid tahay xoolaha oo yaraada, caafimaad darro, nafaqo darro iyo

barakab ay dadku u guuraan meel ay is yidhaahdaan halkaas ayey wax jiraan, taas oo ay ka dhalan karto inay is calaf qaadaan dadku, halkaan ay ka dhalato isku dhac bulsho iyo amni darro.

Mudane Guddoomiye waxaan aad u adkaynayaa si Goluhu u noqdo mid garab istaagaya oo ka gurmanaya dhibaatadaas iyo abaartaas maanta taagan, in aad maanta magacawdo Guddi abaaraha ah oo aad ka soo kala qaato 10-ka Guddi min hal qof, kuwaas oo qayb ka noqda hay'adaha qaran ee ay ka mid yihin Hay'adda Kaydka Raashinka iyo abaaraha iyo Guddida Abaaraha.

Mudane Guddoomiye, waxa kale oo aan sheegayaa inay qayb ka noqon doonaan Wasaaradahan ay tooska u khusayso, sida Wasaaradaha Biyaha, Beeraha, Xoolaha, Caafimaadka, Qorshaynta iyo Diinta iyo Awqaafta.

Sidoo kale waxaan ku ayidsanahay in baaq loo dirro sidii caadiga ahayd Ganacsatada, Hay'adda Caaamiga ah, Hay'addaha maxaliga ah iyo cid kasta oo samafalka jecel iyo Qurba joogtaba si ay arrintanu u noqo mid si weyn gacmaha la isugu qabsado.

Arrintaasi marka ay timaado waxa ka dhalan doonta saddex arrimood oo ay ugu horayso in wixii emergency ah si deg deg ah looga jawaabo, in la helo qiimayn dhab ah oo la ogaado baaxada abaartani inta ay leegtahay, siday ay Goboladu ugu kala daran yihiin iyo siday deegaanada laftirkoodu ay ugu kala daran yihiin. Waa hibaal in abaarta barriga ka taagani ay u darranyihiin oo soo aragnay anaga oo ah Guddida maaliyadda, sidoo kalena waxa jira baaqyo ka imanaya Deegaankii la iga soo doortay ee Gobolka Awdal, sidaa daraadeed waxaan halkan ka sheegaynaa inay abaartani ay tahay mid baahsan oo dhammaan dalka ka jirta.

Saddexaad oo muhiimka ahi waxay tahay in la soo saaro (recovery Action Plan) oo dabagalkiisa leh, waxaan taageersanahay inuu Goluhu furo sanduuq arrintaasi qaadhaan loogu ururiyo oo aynu qayb kaga noqonayno Af iyo Adinba oo laga qayb-qaato Guddidaasina waa muhiim. Waad mahadsan tihiin.

**Md Axmed Nuur Guruuje (7 min):** Bismlilaahi Raxmaani Raxiim. Guddoomiyaha, Mudanayaasha, |Saxaafada iyo Shaqaalaha Aslaamu Calaykum Warax matulaahi Wa Barakaatu.

Waxaan ka hadlayaa afar Qodob oo kooban: Xaalada Guud ee Waddanka, Xaalada Abaarta, xaalada deegaanka gaarka ah ee la iga soo doortay iyo soo jeedin wixii aan hayo.

Xaalada guud ee waddanka marka aan ka hadlo abaarta waxa sal-dhig u ah kow, sicir bararka. Abaarta wixii laga qaban lahaaba waxa hortaagan sicir bararka oo ah wixii dadku biyo ku qaadi lahaa ama raashin ku qaadi lahaa, maalmahan u dambeeyey

shidaalkii uu kacay, sababta shidaalkii circa u tagay Golaheena oo dhammina wuu ogyahay, waxaana wanaagsan in aynaan hadalka ka baydh baydhin oo aynaan sida hudheelada ka hadla odhini aynu qaadhaan bixino iyo aynu baaq soo saarno.

Haddii aan shidaalku jabin waxba laga shaqayn maayo, aniga iyo Xildhibaan Koodbuur Deegaanka laga soo doortay $250 ayaa lawdhka biyo ah lagu gaynayaa, booyada gaynaysaan waa ta xaafada aanu ku jirno u dhaamisa, dooxaa darar –weyne iyo Awbarkhadle ayaa looga dhaamiyaa.

Anigu Hargeisa waxaan imid 1988 aniga oo kai mid Xamar, markaa aan imid biyo wey ku jireen, saakana Booyad ayaa u dhaamisa oo marna miyi ayaa lagu biyo beelayaa marna Hargaysa.

Qoodbka labaad haddii aan xoolihii dadka reermiyiga ah aan xoolihii laga iibsanayn maxay dadku biishanayaa. Labadaas arrin oo labaduba ay tahay in aynu Wasaarada Arrimaha Dibedda iyo Wasaarada Xannaanada Xoolaha u yeedhno ayaa mihiim ah. Haddii aynaan shidaalka jabin Gumadkeenaa waxba kama jiraan.

Abaartu sidaa la sheegay barrina way ka jirtaa galbeedna way ka jirtaa, laakiin waxa jira deegaanka marka galbeed la tiranaya Galbeed lagu tiriyo, marka barri la tirinaya barri lagu tiriyo Goboladan yar yar ee lagu dawarsadana aan lahayn oo Gobolada inoo sharciyeysani waa lix, haddana waxa jira sideed Guddoomiye (badhasaab). Deegaanka Koofurta Hargaysi Gobol malaha oo dhan karri mayno Gobolka daad-madheedh iyo Xaysimo ayaanu nahay.

Marka muwaacinooyin la qaybinayo nalama soo hadal qaado, 30-kaa sanno waxa shaqaynayey hal cee loo Xukumadii Maxamed Siyaad barre uu halkaa ka qoday oo aan tuulada Badar-wanaag oo dhan waraabin karrin oo habeen iyo maalinba 5 foosto soo saara ayaa halkaa ku yaala, kaasina Riig maahee waxa uu waraabiyaha xoolaha yar.

Guddoomiye waxaan leeyahay Deegaanka la ilaabay ceel ha loo qado oo aan barrina ahayn Galbeedna aan ahayn.

Qodobka 53aad farqadiisa 2aad ee dastuurku waxay sheegay in Golahani ka doodi karo, wax ka sheegi karro waxna ka beddeli karro siyaasada dawladda. Laba arrin ayeynu xukumada ka maamuli karnaa waa miisaaniyadda iyo Siysaada dawaladda. Miisaaniyadu waa tii inaga simbibixatay ee sida fudud inagu dhaaftay waxba haatan ka dabatagi maayee.

Wasaarada Xaanada Xoolaha ee Xoolaha qaabilsan iyo Wasaarada beeraha Wasaarada Warfaafinta ayaa ka miisaaniyada badan. Waxay ahayd maalintii la ina dhaarinayey inuu Madaxweynuhu Qudbad sanadeed inoo soo jeediyo, maanta oo aynu bishii labaad

marayno qudbad sanadeedkii Madaxweynaha ma hayno, siyaasadii Xukumadana wali inalama soo hordhigin, aynu siyaasadii xukumada dalbana'oo Guddoomiye adiga iyo Guddoomiyaha Golaha Guurtidu dee Madaxweynaha ka dalbada inuu siyaasada waddanka ina horkeeno oo waddana waxa laga samaynayo inoo sheego.

Guddoomiyuhu isaga adeegsanayo Qodobka 53aad farqadiisa 2aad ha dalbada qorshihii iyo Siyaasadii dawladda. Qodobka 2aad ee aan second garaynayaa waxa weeye; Xildhibaano badan ayaa yidhi halkii Milyan ee aynu doorashooyinka ugu darnay aan ka daba tagno, waxaan odhan lahaa halka milyan waa balaayo xijaab oo intaas ayeynu ka iibinaa intaas maaweelada ahi, meelaha aynu ilawnay ee warfaafintu ka mid tahay ee 6 milyan aynu dhignay ee dadkii maanta biyo la'aan u dhimanayaan ka daba tagna'oo haddii aynaan miisaaniyaddii soo wadda celinayn meelaha aan daruugiga ahayn aynu ka dabatagna'oo biyaha iyo baadka aynu xooga saarno. Goluhuna wuu mahadsan yahay.

**Md. Cabdixakiim Hugur Cabdi** **(2min, 40sec):-** Bismilah Alxamdulilah, Waslaatu Wasalaamu Calaa Rasuulilahi Salalaahu Calayhi Wa salam, Mahadsanid Mudane Guddoomiye.

Guddoomiyaha, Mudnaayaasha, Shaqaalaha, Saxaafada iyo Martidaba ASC, Sida aynu wadda ogsoonahay waxayu maanta halkan kaga hadlaynaa Abaaraha baahsan ee waddanka haysta.

Sida ku cad **Qodobka** 35aad farqadaha 3aad, 4aad iyo 5aad waxa Goluhu ama Baarlamaanku leeyahay awoodo iyo waajibaad dhaafsiisan xeer samayn ama xeer dejin. Goluhu waxa uu xukumada kala talin karaa xaaladaha soo jordha ee siyaasdeed, sicir barar, dhaqaale, nabadgelyo ee soo kordha, sida abaarta maanta taagan oo Goluhu talo ka siin karra Xukumada, haddana waxa maanta jirta abaar baahsan oo ay ka mid tahay biyo la'aantu.

Xukumadu waxay magacawday guddi abaareed oo aynaa war ka hayn hawshooda wax qabad, xildhibaano si gaar ula kulmay mooyee aanu Goluhu la socon hawlahooda wax qabad iyo siday wax u waddaan. Waxa muuqata dedaal la'aan xukumada iyo shacabka ah oo aanay jirin dedaalkii looga baahnaa ama sidii gacmaha la iskaga qabsan lahaa oo la iskaga kaashan lahaa xaaladan abaareed, waxa maqan taageeradii hay'adaha caalamiga oo dalkan kaga qayb qaadan lahaa xaalada abaareed.

Ma haboon tahay in aynu fadhiga ka kacno oo baaq dheer u dirno xukumada iyo cid kasta oo ay khusayso arrintani. Waxaan taageersanahay wixii xildhibaanadii iga horeeyey ay yidhaahdeen, waxaan soo jeedinayaa in loo yeedho Guddida abaaraha oo laga waraysto halka wax marayaa

Waxaan soo jeedinayaa in baaq qoraal ah loo jeediyo Hay'adaha caalamiga si ay taageero uga gaystaan xaalada abaaraha.

Waxaan soomjeedinayaa baaq qoraal loo gudbiyo Ganacsatada oo lagag dalbanayo taageero. Waxaan soo jeedinayaa in kal fadhi kasta oo Goluhu yeesho laga hadlo xaalada guud ee dalka oo aynaan mooganaan.

**Md. Maxamed Abiib Yuusuf (10min, 24sec):- Mahadsanid Guddoomiye, Ilaahybaa Mahad leh** Wajacalnaa minal  maa'ii afalaa yuminuun, ( wa ansalnaa Milnal musiraatii maa'ansajaajaa, li nukhrija bihii xaban wa nabaataa) Ilaahay waxaan uga baryayaa inuu dadka madar khayr qaba u liso, oo uu circa madar uga keeno (Allaahuma asqinaa, Allaahuma Asqinaa). Ilaahayoow waanu kuu baahanee na soo waraabi dad iyo duunyaba waanu kuu baahanee.

Waan ku raacsanahay mudanayaashii hore soo jeedimahoodii. Laba wiig ka hor waxa halkan inagu soo martay Miisaaniyaddii ahayd inay ka jawaabto baahida iyo Masuuliyada dadka. Waxba kaga noqon maayo, laakiin ilaahay waxa uu yidhi (Atan muruuna calal biri, watan saruuna anfuskum anoo kitaaba afalaa tacqiluun). Golaha Xukumada waxaan ku canaanto oo badan garan maayo, oo Golahani waa Golihii la doonayey inuu waajibaadkiisa Guto weeye Golahani.

Guddoomiye waad ku mahadsan tahay in aad kulankan oo kale aad qabato. In loo baaheeyo dadkeena waxa ka qurux badan in lacagta ay xaqa u leeyihiin loo doono. Inaynu DP world lacag ka codsano oo walaalo na waaci nidhaa, wax aka fiican in Golahani doono 35% faa'iidada ahaa oo meel ay ku qoran yihiin iyo cid qaadata ilaa maanta aan la aqoonin, si abaaraha loogu kabo.

Waxaan doonayaa lacagta madaarka ka soo baxda ee Security barking Madaara iyo lacagta diyaaradaha laga qaado iyo handling ee dhawr iyo tobanka million ah inuu Golahani umaddaa haraadan u doono ayaan doonayaa oo lacagtaa lagu kabo abaarta.

Waxaan doonayaa lacagta laga qaado ajaanibka ee aan warbixintaydii Miisaaniyadda ku daray ee lacagta adag ah ee meel ay ku dhacdo aan la garanayn ayaan doonayaa in dadka abaaraha loo doono.

Waxaan Gobolada barri ku tagay Safar, nin walba ceesaantii ceelkeentay dalkeena ma waddayso. Gobolada Barri markii u horaysay ayaan tagay taariikhda. Waxaan aad u tabaayey oo qalbigayga gubaysay in aan helo fursadan oo kale. Waxaan soo arkay dad ay ka muuqato dushooda, doonyadooda iyo deegaankaba ay biyo la'aani ka muuqato oo haraad ku nool.

Waxaan soo arkay dad habeen iyo maaliba I walwal galiyey oo aan cidhi cidhibtooda dambe xagay noqon doontaa. Waxa loo baahan yahay qorshe qaran oo dadkaa biyo loogu raadinayo. Xagan galbeedka arki maysid wax magaalo oo soo kordhaysa, waxaan arkay nin yidhi waxaan ka maqnaa muddo sanad ah, waxa samaystay 7 kaam qaxoonti.

Galbeedka marka daruur yari la helo nin garaw yar beerta iyo afarta beerta afarta sac haysta wuu heli karaa calafka ay cunayaan.

Qorsheyntii Qaranka Guddoomiye waxaynu baahan nahay in aynu u yeedho wasiirka qorsheynta ee diiday inuu Golaha horyimaado oo laga waraysto halka uu marayo qorshihii seddexaad ee horumarinta Qaranku oo halkan aynu ka asixino. Miisaaniyada sanad shaqaynaysa ayaa la keenaa ama diidno ama ogolaanee. Qarankani noqon maayo Qarankii Gurmadka, Qarankii Gargaarka waxay u baahan qorshe waaraya oo biyo siinaya Goboladeena barriga oo aan qof dambe haraad inagaga dhiman.

Waxaan doonayaa oo aan soo jeedinayaa in qolyaha macaashal macaashku ku baaqday in laga soo qaado oo loo geeyo dadka abaaruhu ku dhaceen.

Waxaanu soo aragnay Guddoomiye dhisme Wasaarada xannaanada xoolihuhu tidhi naafinta iyo bac riminta oo lagu faanayey oo xitaa aan albaab lahayn.

Waxaanu soo aragnay cusbitaaladii Gobolada barri oo aan xabad irbad ahi dhex oolin, waxaanu soo aragnay hal dakhtar ayaa jooga ceerigaabo isagiina xanuusaday, waxaanu soo arag cusbitaalka oog oo aan la furin oo ciidii buuxisay. Mudanayaal idinma canaanayo, si waxaan doonayaa in aynu waajibkeena gudano.

Afartii sanno ee u dambeeyey aad ayaa loo hadal hayey Guddida abaaraha, waxaynu isla aaminay hebel gadhbuu leeyahau, hebel bakhaar ayuu leeyahay. Adduunyada waxaas la iskuma aamino (Ilaahay ma eego jidhkiina iyo sawiradiina, laakiin waxa uu eegaa quluubtiina) haddii aad qofkaasi shaadh cad ayuu sitaa ku aaminto oo aan la iskaga dabatagayn oo xisaabtaasi habraac lahayn oo dadkaa wixii loo dhiibay aan la garayn, sideen ku aaminaa ma waxaan aaminaa hebel gadh ayuu leeyahay iyo tukaan.

Lacagtaasi xisaab ayey inaga doonaysaa iyo inaynu ka dabatagno, ta imika ay leeyihiin xildhibaanadu oo sanduuqa ha lagu shubo, laguma shubi karo ilaa tii hore la hubiyo.

Waxaan ku soo gebo-gebaynayaa oo biyo kama dhibcaana oo u baahan in aynu go’bada taabano dalka lacag biyaha lagu bixiyo. Maxaa la isugu dilayaa Wasaarada Biyaha, waxa mara maashriic beeb ah. Maalintii dhawayd waxa hubaal ah qalabka biyaha lagu eego ee biyaha sheegaa wasaarada ayuu yaalay. Miisaaniyaddii waxa ku jitay soo iibinta qalabka Biyaha cabira, imisa qalab ayuu dalku u baahan yahay, imisa qalab ayaa loo baahan

yahay qalabkii wuu yaalaa, laakiin ciddii ku shaqaynaysay lama hayo, haddana qalab cusub ayaan dalbanay.

Riig ayaa la geeyey Gobolada barriga, inta riiga laga taago ayaa habeen madaw la isaga soo guurayaa, waxaan leeyahaya biyo ha loo raadiyo Deegaanada barriga dhaw ee Sabo-wanaag oo biyo ha loo helo.

**Md Xuseen Adan Cali** **(8min, 47sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Guddoomiyaha iyo Mudaneyaasha aad ayaad u mahadsan tihiin. Waxaan taageersanahay wixii badnaa ee Mudanayaashii iga horeeyey ka hadleen.

Marka lagu dhaadhaco abaarta jirtaa waxa u badan tahay laba arrin oo kala ah biyo la'aan iyo dhaqaale la'aan.

Dadka reermiyaga waxay dhaqaalaha ka helaan Xoolaha oo sayladii iibka ayaa xidhan, waxa kale oo jira raashinkiin oo kacay iyo shidaalkii oo kacay iyo dhaqaalihii lagu soo iibsan lahaa oo jirin.

Xagga xoolaha waa jiraa in kasta oo xoolihii jiraa oo xagga miyiga xoolahihii sii fiican yihiin, dadku waxay u baahan yihiin baad iyo Biyo.

Waxaan nahay Gole la soo doortay oo wakiil iyo masuul ah dhammaan Gobolada Somaliland. Qaabka Xukumadu u maamushay Guddida abaaraha, waxay tahay in wax laga beddelo oo xukumada wax kaga jiraan, ganacsatada wax kaga jiraan, and aqoonyahan wax kagag jiraan iyo ay noqoto guddi noocaas ah.

Laakiin maanta Xukumadu iyadda qaybinaysaa, iyaddaan Guddidii ah oo toddaba xubnood oo ah Madaxweyne ku xigeenka iyo lix wasiir oo la yidhaa Guddida Qaran ee abaaraha. Waxaan ognahay culayska saaran Wasiirka oo tiisiiba dayacan tahay, waxaan ognahay wakhtiga iyo jaaniska uu ku qaban karo hawshaas oo iska kooban.

Waxaan ognahay Guddidii abaaraha ee inoo shaqayn jiray ganacsatada ayey ka qaadi jireen, shacabka ayey ka qaadi jireen, xukumada ayey ka qaadi jireen, ardayda yey ka qaadi jireen, oo hay'adaha caalamiga ah ayey ka qaadi jireen, waxa madaxweynaha la kulmi karri waayey kuwii abaaruhu ku dhaceen oo meelahan wareegayey.

Waxaan soo jeedinayaa in magacaabo Guddidu qaran oo hawshaas ka soo bixi kartaa oo aan la odhan Wasiir hebel ayaa Guddida abaaraha ku jira.

Waxaan ka soo baxay Gobolka Togdheer oo la iga soo doortay abaartuna waxay soo jirtay muddo, Gobokuna waa laba qaybood barri iyo galbeed. Deegaamadiisa laga soo bilaabo duruqsi, aboguroyaale iyo ilaa inna carabay oo ah deegaanka Maroodi jeex u baaleeya inta u dhaxaysa waxa u biyo ah hal Riig kaba dheere.

Riigaas waxa maalintii ka caba xoolaha habeenkiina waxa kuyuu u gala laba casho ku qaadataa Booyadaha. Riiga khaliif foundation waxa uu u taagan yahay solar oo kaliya, Booyada labada habeen kuyuuga ku jirtaa waxay gaysaa meel fog. In riigaasi u taagnaado solar yar waa xil gudasho la'aan.

Waxaan soo jeedinayaa in Guddidaas la beddelo oo lagu baddelo Guddi Qaran oo ka kooban Ganacsatada, Aqoonyahan, Xukumada iyo dhammaan dadka waayo u arag ku ah inay hawshaan gutaan.

**Md Cabdinaasir Yuusuf Cismaan (9min, 41sec):-** Bismilah Alxamdulilah, Waslaatu Wasalaamu Calaa Rasuulilahi Salalaahu Calayhi Wa salam. Arrintan waxaan u arkaa ciyi waa ka baryey.

Waxaynu ahayn Gole cusub, waxaana soo jeediyey in xaalada dalka dib loo eego, waxaanan u arkay inay tahay dib u dhac Golaheena ku yimid.

Waxaynu jirnay 30 sanno baaahiyaha iyo abaaruhu ay jireen, laakiin ay soo xoogaysanaysay muddooyinkii u dambeeyey, 10 arday ayaa sanad walba soo qalin jabiyeen oo ay gidaar kasta taagan yihiin. Caafimnaadkeena waxa dawooyinka lag8 iibiyaa oo pharmacy ka furan yihiin gidaar kasta oo ay waxay doonaan iibiyaan ciday doonaana naafeeyaan oo aanay cidina wax iska waydiin.

Waxaan soo jeedinayaa Mudane Guddoomiye in aynu xaalada dalka qiimayna oo Guddi u saarna oo xaalada Gobolada soo qiimaysa oo ciday khusaysa kula xisaabtanta.

Xiligii doorshada waxaanu soo marnay Gobolada barriga oo ardaydii geedo hoostood wax loogu dhigaayo.

Abaaruhu waxay leeyihiin oo miisaaniyada u ansixinay Hay'adda ka hortaga masiibooyinka iyo abaaraha. Shaqo ay qabato ma hayno, qorshe ay diyaariusay ma hayno, qalabkii la soo iibiyey inay inooga warbixiso ma hayno.

Mudane Guddoomiye Waxaan soo jeedinayaa in aynu u yeedho hay'adaas oo la xisaabtano oo agabkii badnaa ee la iibiyey abaaraha loo iibiyey Guddida kala xisaabtano oo wixii ay xog hayaan iyo qorshaha ay hayaan oo arrintan waxay kaga hortagayaan talo iyo arrin ula tagno.

Waxa kale oo aan soo jeedin lahaa wasiirka Biyuhu wuxuu yidhi 503 ceel ayaa dalka laga fuliyey, dhibaatada ugu badan ee aan aragnay nin contract ah ayaa la siinayaa mashruuc riigbuu qodoyaa maalintaas ayaa ugu dembaysa. Riigii cid ka daba tagtaa ma jirto. Marka abuurtu timaado ayaa la xasuusanayaa oo la odhanayaa mashiinkii uu fadhiyaa.

Waxa jira baliyo mashaariic lagu bixiyey oo aan laga dabatagin, salaxlay Bali ayaa nin la siiyey waxa uu dhigay Bac bilaa tayo ah oo halkaas ku khasaaray iyadda oo lagu bixiyey $500,000 oo khsaaray, waxay in lagu ciqaabo oo lagula xisaabtamo ninkaas qandraaslaha ah.

**Mudane Guddoomiye waxaan soo jeedinayaa Wasaaradii biyaha oo qorshaha blaadhan oo keentay oo tidhi intaas Bali ayaanu qodaynaa loo yeedho ama Guddidu loo saaro oo xaqiiqda soo aragta.**

**Waxaan soo jeedinayaa Guddoomiye waxa jira Guddi shaqaysa, waxaan soo jeedinayaa mudanayaal bil mushaharkeed ama laba bilood mushaharkeed aynu iska jarno oo ku caawino.**

**Waxaan soo jeedin lahaa in aynu xogogaal u noqo arrimo badan oo ka mind tahay arrimaha Dibadda, nabadgelyada oo aynu la xisaabtan oo aynu u yeedho ciddi ay khusayo oo aynu shaqayno ayaan soo jeedinayaa.**

**Md. Xasan Kayse (3 min iyo 54 sec)**: Bismilah Alxamdulilah, Waslaatu Wasalaamu Calaa Rasuulilahi Salalaahu Calayhi Wa Salam.

Mudane Guddoomiye waad mahadsan tahay, fadhigana waa fadhi loo baahnaa oo ay tahay in lagaga hadlo fadhiyada noocan ah. Arrintan wax aka hadlay xildhibaano badan mana doonayo in aan ku noqdo. Gurmadka biyo dhaamintu wuxuu soo socday muddo 4 bilood ah, Meelaha biyaha laga dhaamiyo foostada biyaha ahi waa $4 ilaa $5 doolar. Biyaha tuulooyinka la geeyo waxa kaliya oo cabbaa waa dadka, waliba biyo la melaan xoolahiii, taasna waxa og qofka xoolaha leh.

Xooluhu markii la iibsan waayey, biyana ay waayeen waxa xiga waa xoolaha oo bakhtiya, iyo macauul dadka soo gaadha, markay taasi dhacdana waxa ka dambeeyaa waa xaalad caafimaad darro oo dadka soo gaadha oo ka daran abaaraha.

Mudane Guddoomiye, waxaan soo jeedinayaa oo aan baraarujinayaa Wasaarada caafimaadka iyo Wasaarada Xannaada Xoolaha in sida Gurmadka biyo la'aanta loogu jiro ee loo gurmanayo ay u diyaar garoobaan xanuunada dilaaci karra, xoolaha bakhtiyi karra iyo xanuunada ay keeni karro, Waxa kale oo aan soo jeedinayaa in gurmadku uu noqdo dhinac kasta oo xoolahana loo gurmado.

**Md: Jamaal Cali Aadan; waxaan soo jeedinayaa;**

- Waa in Mudanayaashu 3-bilood Mushaharkooda ku taageeraan dadka ay abaartu saamaysay oo ay nafteena ka bilawno.
- Waa in xukuumada gurmad deg-deg ah la gaadho dadka Abaaraysan loona sameeyo qorshayaal.
- Waa in Guddida Abaaraha Golaha Looga yeedho si looga waraysto xaaladahan taagan ee aynu ka hadlayno.
- Waa in qurba joogteenu si deg-deg ah Gurmad ula soo gaadhaan Dadkaa Abaaruhu hayaan.
- Waa in ay hay'addaha qaadhaan bixiyayaasha ahi ay ka qayb-kaqaataan gurmadka lagu taban taabinaayo shacabka tabaalaysan.
- Waa in miisaaniyada soo socota ee Qaranka looga qoondeeyaa Qayb, si loogaga gaashaanto Abaarahan soo noqnoqday.

**Md: Maxamed Xuseen Jaamac (Raanboo): waxaan soo jeedinayaa;**

- Waa in Ganacsatada Waaweyn ee Dalku ka qayb qaataan Abaaraha, waayo waa xiligii ay u baahnaayeen dadka ay ka ganacsanayaan.
- Waa in hay'addaha caalamiga ahi ka qayb qaataan sidii ay ugu gurmadeen Abaartan, abaartii ka horaysay.
- Waa in guddida Abaaraha lagu darro xildhibaano ka mid ah Golahan si ay uga warqabaan xaalada markaa taagan iyo waxyaabaha loo baahan yahay.

**Md. Khadar Cali Xakiin; waxaan soo jeedinayaa;**

- In maalmaha aynu shaqayno aynu ku darno maalin sidan oo kale ah lagana hadlo Abaaraha.
- In mushaharkeena aynu ku deeqno dadka Abaaruhu saameeyeen.
- In aynu ka daba tagno sidii xidhibaanadii iga horeeyay soo jeediyeen Miisaaniyada Qaranka wixii suuro gal ah ee aynu ka daba tagi karno.
- Waxaa kale oo aan taageerayaa in gudoomiyuhu uu u saaro guddi Arrita abaaraha.
- Waxaa kale oo aan taageerayaa in lala xisaabtamo booyadihii waawaynaa ee dhawaan la iibiyay iyo halka ay ku danbeeyeen iyo halka ay ka shaqaynayaan.

**Md. Xassan Saleebaan Dhuxul Laab-saalax waxaan soo jeedinayaa;**

- Waxaynu u baahanay siyaasad qaran oo biyo qabasho leh.
- Waxay ahayd in maalintii aynu Miisaaniyada ansixinaynay aynu ugu darno dadka tabaalaysay 4-riig oo biyo loogu soo saaro.

- Xaaladaha wax-barsho, caafimaad iyo nololeed waa in golahan oo ka mid ah Afarta dhadhaar ee Dawlad nimada waa in aynu hormood u noqonaa sidii aynu wax uga baran lahayn.

**Md. Axmed Cabdikariim Ducaale; Waxaam Soo jeedinayaa;**

- Golahani waxa uu ka kooban yahay guddiyo, guddiyaa qaabilsan arrintan aynu maanta ka hadlayno ee abaaraha markaa waa in guddiyadaasi warbixino Golahan keenaan.
- Waxaan la qabaa mudanayaashii soo jeediyay in xildhibaanadu ku noqdaan meelihii laga soo doortay si ay warbixin dhab ah uga soo dirraan.

**Md. Mustafe Axmed Cabdilaahi (Khayreeye); waxaan soo jeedinayaa;**

- In la sameeyo laba Guddi oo ka kooban Golahan Qolana u Baxdo Galbeed Qolana u baxdo Barri si ay u soo qiimeeyaan baaxada Abaartu leedahay.
- In Xidhibaanada Galbeedka ka soo baxay barri la geeyo kuwa Galbeedkana barri la geeyo.
- In aan saacadaa aynu taaganahay aan loo yeedhin Guddida Abaaraha, inaga oo aan hayn wax xog ah, ee loo yeedho marka ay guddiyadaasi xog-dhab ah keenaan guyadaasi.

**Md. Cabdikariin Maxamed Muxumed; Waxaan soo jeedinayaa;**

- In ka xidhibaano ahaan aynu ka qayb qaadano wax ka qabashada Abaaraha, iyo aynu baaqa aynu jeedinayno ku darno hay'adaha caalamiga ah, dawlaha aynu saaxibada nahay iyo cid kasta oo danaynaysa arrintaa.
- In aynu qorshaha ku darsano in wadanka loo sameeyo biyo xidheeno iyo in la hagaajiyo tayada qalabka lagu qabanayo biyaha sida bacaha oo kale.
- Waana in miisaaniyadaha soo soda aynu xooga saarno biyo soosaarka.
- Waxa aan taageerayaa in Guddi la saaro soo qiimaysa Arrimaha Abaaraha ee ka jirra dalka.

**Md. Yaxye Cabdilaahi Aamin (Yaxye-Araarse); waxaan soo jeedinayaa;**

- Waa in lagu daydaa ganacsade Oomar oo baryahanba ka qaybinayay calaf iyo biyaba Gobolada ay abaartu saamaysay, gaar ahaa Gobolada Barri.
- Waa in Gole ahaan aynu aynu sida ugu dhakhsaha badan wax u gaadhsiinaa dadka baahan ee abaaruhu ay saameeyeen.
- Waa in dawladu wixii ay hayso kayd ama ay ugu talo gashay doorashooyinka u weecisaa dadkaa dhimanaya ee ay doorashada ka sugayaan in ay codeeyaan.

- Waa in Guddi loo saaro arrimaha Abaaraha sidii mudanayaashii iga horeeyay sheegeen.

**Md. Saalax Maxamed Diiriye; waxaan Soo jeedinayaa;**

- Waxaan la qabaa xildhibaanadii iga horeeyay in aynu baah dheer loo diro cid walba oo la martiyi karro.
- Waa in Loo yeedho Guddida Abaaraha ee Heer Qaran, Hay'adda barakacayaasha Qaranka, Hay'adda Aafooyinka iyo u diyaar Garawga iyo kaydka qaranka.
- Waa in dadka wax haystaa ay la baxaan wixii ilaahay siiyay.

**Md. Maxamuud Faarax Jaamac; waxaan soo jeedinayaa;**

- Waa in dawladu ay isticmaasho wixii baanka ku jira ee kaydka inoo ahaa waayo dadkii way dhimanayaan kamana gaadhno qaylo dhaan aynu dirno.
- Waa in Guddida Abaaraha loo yeedho lana yidhaa jeebadaha fura oo gurmadka gaadhsiiyada dad tabaalaysan.
- Waa in si dadka biyo loo gaadhsiiyo loo helaa wax qaada biyaha.

**Md. Axmed Cabdi Muuse (Inni); Waxaan soo jeedinayaa;**

- Waa in wasaarada Qorshayntu Abaaran soo Noqnoqonaya ay qorsheyaal ka samaysaam.
- Waa in guddi loo kala dirro Gobolada dalka barri iyo Galbeedba, si inaga oo xog-rasmi ah aynu u yeedhano guddida Abaaraha.
- Waa in dadkaa abaaruhu hayaan loo sii daayaa wixii miisaaniyada ugu jirra Abaaraha.
- Waa in Golahani uu daraasad soo sameeyaa si wadankan looga saaro biyo la'aanta.
- Waa in muhiimada loo kala siiyaa sida ay u kala nugulyihiin dadkaa Abaaruhu saameeyeen.

**Md. Guuleed Maxamed Warsame waxaan Soo jeedinayaa;**

- Waa in aynu caalamka kaga dayanaa siyaabaha ay uga bexeen abaarihii soo maray, waxna ka baranaa shirarkaa ay ka galeen.
- Waa in shirkadaha baadha biyaha laga wardoonaa, waayo waxay ka qaalisan yihiin wadamada aynu jaarka nahay oodhan.

**Md. Xassan Cumar Xassan; waxaan soo jeedinayaa;**

- Waa in Wasaarada Diinta ay Aw-qaaftu imaamadah Masaajidaha ku Amarto in Ducadii Qunuuda lagu darro si Alle looga baryo raxmaadkiisa.
- Hay'adda inoo qaabilsan Abaaruhu xeer jabin ayay samaysay, waayo waxaa la beddelay magicii hay'adda, waa in iyada lala xisaabtamaa.
- Hay'da DPWolrd wax uu ku qabaa Golka saaxil ku qabaa ma jirto ee waa magac uun.

**Cawad Cali Maxamed**
**Agaasimaha waaxda H/Qoraalka G/Wakiilada**
______________________________

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI**
______________________________